



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Luulyo 12, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ku dhawaaqista Agaasimaha ee SACU

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in Sierra Rawson ay aqbashay booska joogtada ah ee Agaasimaha Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka ee ODDS (SACU).

Sierra waxay soo noqotay Agaasimaha Ku meel gaarka ah tan iyo Maajo 2020. Waxay u soo shaqeysay SACU muddo afar sano ah iyada oo soo qabatay doorar hoggaamineed oo kala duwan. Waxay leedahay in ka badan 20 sano oo ah khibrada qaybta naafanimada maskaxda ama korriinka.

Ka hor inta aysan u soo shaqeynin SACU, Sierra waxay ahayd xubin ka tirsan kooxda hoggaaminta sare ee Home Life, oo ah urur aan faa'iido doon ahayn oo ka jira Degaanka Benton, oo bixiyana guryaha la degan yahay, nolosha la taageero, iyo adeegyada xirfadeed oo 24-saacadood ah. Waxay sidoo kale adeegyada maamulka kiiska siisay dad ku nool degaanka Linn iyada oo ah Wakiilka Shakhsiyeed oo leh Isku xirnaanshaha Ilaha ee Oregon, oo ah hay'ada adeegyada taageero.

Sierra waxaa booska agaasimaha loo doortay ka dib markii ay nidaam wareysi oo adag la martay guddi daneeyayaal ah. Hoggaaminteedi intii lagu jiray cudurka baahsan, dabka kaymaha iyo xaaladaha degdega ah oo kale oo la taabaan karo ayaa caddeeyay in ay tahay shakhsi ku haboon shaqada. Fadlan igula soo biira u hambalyeynta Sierra.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-  
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).